

SHARCIYADANI WAXAY ILAALIYAAN
SHAQAALAHA IYADOON LA EEGAYN XAALADA
SOCDAALKA EE SHAQAALAHA AMA GOOBTA
AY KU TAALO SHIRKADA SHABAKADA.
SHIRKADHA SHABAKADU WAA INAY U
HOGGAANSAMAAN SHARCIYADAN.
AARGOOSIGU WAA SHARCI-DARRO.



**Seattle Office of
Labor Standards**

Ogeysiiska Xuquuqda Shaqaalaha App-ka Ku-salaysan ee 2025

Ogeysiiskan waa in lagu daraa arjiga onlaynka ah ee shirkadda shabakada ama madasha isagoo ku qoran Ingiriisi iyo luqadda uu ku hadlo shaqaaluhu.

SHARCIYADAN YAA AY KHUSEEYAN?

Shaqaalaha app-ka ku-salaysan oo Seattle dhexdeeda uga shaqeeya **shirkad shabakadeed** oo daboolan oo u fududaysa shaqada ugu yaraan 250 shaqaale oo app-ka ku-salaysan ee meel kasta oo ay dunida ka joogaanba. Shirkad shabakadeed oo daboolan:

- Waxay adeegsataa app-yo ama barnaamijyo onlayn ah si ay macaamiisha ugu xirto shaqaalaha app-ka ku-saleysan;
- Waxay shaqaalaha u soo bandhigtaa shaqooyin; iyo/ama
- Waxay fududaysaa bixinta adeegyada ay mushahar ku qaataan shaqaalaha app-ka ku salaysan.

"Shirkadaha Shabakadda Suuqa" oo ugu horrayn soo bandhiga dalabyo horay loo sii qorsheeyay, waxay u oggolaadaan macaamiisha inay isweydaarsadaan macluumaadka ku saabsan shaqada shaqaalaha ku saleysan app-ka, u oggolaadaan shaqaalaha ku saleysan abka inay dejiyaan qiimahooda, oo aan la socon wax-soo-saarka masaafada iyo **waqtiga aan la daboolin.**

BIXINTA UGU YAR EE SHAQAALAHA APP-KA KU SALAYSAN

Siinaya shaqaalaha ku salaysan abka xaqa ay ku helaan lacagta ugu yar ee "Waqtigooda La Qabanayo" iyo "Maaylada Hawlgelinta".

WAQTIGA HAWLGALKA

Shirkadaha shabakadaha aad loo dalbado ama shaqooyinka aad loo dalbado:

- waxay bilaabmaan marka shaqaalaha app-ka ku salaysan uu aqbalo shaqada.
- Waxay dhamaadaan marka shaqaaluhu dhammeeyo shaqada, shaqada la joojiyo, ama shaqaaluhu baajiyo shaqadu isagoo sabab haysto.

Dhammaan shirkadaha kale ee shabakadda ama shaqooyinka:

- Waxay bilaabmaan marka shaqaalaha app-ka ku-salaysan uu bilaabo shaqada ama yimaado goobta lagu sheegay shaqo bixinta.
- Waxay dhamaadaan marka shaqadu dhammaato, shaqada la joojiyo, ama shaqaaluhu baajiyo shaqadu isagoo sabab haysto.

MASAAFADA/MAYLASHA HAWLGALKA

Masaafada/Maylasha la safray waqtiga hawlgalka

LACAGTA UGU YAR EE SHAQO KASTA

hadba midii badan:

\$0.45/daqiiqo +

\$0.77/maylkiiba

—AMA—

\$5.20

Haddii dalabka shaqadu ka bilowdo Seattle, markaa shaqaalaha waxa la siinayaa lacagta ugu yar ee dhammaan wakhtiga iyo maylasha hawlgalka. Haddii dalabku shaqada uusan ka bilaaban Seattle balse ay ku jiraan joogsiyo ama adeegyo shaqo oo laga dhex qabanayo Seattle, lacagta ugu yar waxay khusaysaa keliya wakhtiga iyo maylasha hawlgalka ee gudaha xadka Seattle.

WAA MAXAY "SHIRKADDA SHABAKA-DEED EE AAD LOO DALBANAYO" AMA "SHAQADA AAD LOO DALBANAYO"?

Shirkad bixisa, ama shaqo shaqsiyeed oo loogu talagalay, geynta dalabka ama adeegyo kale oo ay tahay in lagu bilaabo 2 saacadood gudahooda marka shaqaaluhu aqbaloo shaqada.

SHIRKADDAN WAA:

Shirkad shabakadeed oo aad loo dalbanayo

Shirkadda shabakadeed ee suuqa

Shirkad shabakadeed, laakiin aan ahayn kuwa kor ku xusan midkood

XAQA LOO LEEYAHAY DABACSANAANTA

Shaqaalaha app-ka ku-saleysan waxay xaq u leeyihiin inay go'aan ka gaaraan goorta la heli karo iyo dalabyada ay aqbalaan/ diidaan.

Shirkadaha shabakadu tillaabo xun ka qaadi karaan shaqaalaha:

- Xadido saacadaha la heli kara
- Aqbalo ama diido shaqo
- Baajiyo shaqo iyagoo sabab haysta

Ficilka xun waxa uu noqon karaa shay sida xadidista gelitaanka app-ka ee shaqaalaha ama xirida akoonka shaqaalaha

XUQUUQDA TIB BIXINTA

Shaqaalaha ku salaysan App-ka waxay xaq u leeyihiin inay helaan macluumaad cad oo ku saabsan siyaasadda tib bixinta ee shirkadda.

- App-ku ma u saamaxayaa macaamiisha in ay hore u sii bixiyaan tibka?
 Haa
 Maya
- Macaamiishu wax ma ka beddeli karaan ama meesha ma ka saari karaan tibyada ka dib markay shaqadu dhammaato?
 Haa
 Maya
- Dhammaan tibyada waa in la siiyaa shaqaalaha app-ka ku-salaysan
- Tibyada ku ma jiraan xisaabinta mushaharka ugu yar

XAQA LOO LEEYAHAY MACLUUMAAD HORDHAC AH

Shirkadaha shabakada ku jira waa inay bixiyaan ama xaqiijiyaan in macmiilku siiyo shaqaalaha:

- Qiyaasta wakhtiga hawlgalka iyo masaafada/maylasha hawlgalka
- Lacagta ugu yar ee la damaanad qaaday
- Qadarka tib (lacag uu macmiilku iskii u siiyo qof u adeegay) kasta oo macaamiishu sheegeen inay bixinayaan
- Magacyada meheradaha loo baahan yahay in la joogsado
- Macluumaad ku saabsan shaqada gacmeed ee loo baahan yahay (tusaale, miisaanka alaabta, tirada jaranjarooyinka), haddii ay suurtagal tahay
- Macluumaad ku saabsan qaar ka mid ah waxyaabaha aan la xirin ee dalabaadka onlaynka ah, haddii ay suurtagal tahay

ISTICMAALKA KHIYAANADA AH EE XUQUUQDA SIYAASADDA

Shaqaalaha app-ka ku-salaysan waxay xaq u leeyihiin bayaan cad oo ku saabsan siyaasadda isticmaalka khiyaanada ah ee shirkadda shabakadda.

Siyaasadda ayaa laga heli karaa halkan:

WAQTIGA JIRRADA IYO BADBAADADA EE MUSHAHARKA LEH

SHAQAALAHA APP-ka KU-SALAYSAN WAXAY XAQ U LEEYIHIIN:

- Kasbo ugu yaraan hal maalin oo ah PSST 30-kii maalmood ee aad ka shaqeeyso gudaha Seattle
- Maalin kasta oo aad alaaba ka soo-qaadid ama ku dejisid gudaha Seattle ku xisaabi kasbashada PSST
- Ogeysiiska bilaha ah ee PSST-da kuu uruurtay, qaddarka la heli karo, qaddarka la isticmaalay, iyo heerka lacag bixinta ee loogu talagalay PSST
- Maalin kasta oo ah PSST oo aad isticmaasho, ha lagu siiyo celceliska heerka mushaharka maalinlaha ah
- Qaado wakhtiga fasaxa ah ee aad heli karto adigoo adeegsanayo kala go' 24 saacadood ah
- Nidaam la geli karo si loo isticmaalo, loo fahmo oo loo codsado PSST

WAQTIGA FASAXA MUSHAHARKA LEH WAXAA LOO ISTICMAALI KARAA SABABAHAN:

WAQTIGA JIRRADA/XANUUNKA: Si loo daryeelo xaalad caafimaad jireed ama mid maskaxeed, oo ay ku jiraan ballamaha caafimaadka, ha noqdaan kuwa nafsadooda ama kuwa xubnaha qoyskooda

WAQTIGA BADBAADADA: Sababaha la xiriira rabshadaha qoyska, faraxumeynta, dabagalka, xiritaanka shaqada oo ka dhasho amarka caafimaadka dadweynaha, marka dugsiga ama goobta daryeelka la xiro, kuwaasi oo saameeynayo nafsadooda ama xubnaha qoyskooda

XAQA LOO LEEYAHAY IN CABASHO LAGA GUDBIYO HAKINTA/DIIDMADA MAGDHOWGA

Shirkadaha shabakadu waxay hakin karaan magdhowga haddii shaqaale app-ka ku salaysan uu PSST u isticmaalo sababo aan la ogolayn. Shaqaalaha app-ka ku-salaysan waxay xaq u leeyihiin inay cabasho ka bixiyaan oo ay caddeeyaan in isticmaalkooda waqtiga jirrada iyo waqtiga badbaadada ee mushaharka leh uu ahaa mid ku aadan ujeeddo la oggol yahay.

AARGOOSIGU WAA MAMNUUC

Sharciyadani waxay shaqaalaha app-ka ku-salaysan ka ilaaliyaan aargoosiga ku aadan adeegsiga xuquuqahan.

XAQA LOO LEEYAHAY IN CABASHO LA GUDBIYO

Shaqaalaha App-ka ku-salaysan waxay xaq u leeyihiin in ay cabasho u gudbiyaan Xafiiska Miqyaasyada Shaqaalaha ama inay gudbiyaan dacwad sharciyeed haddii shirkad shabakadda ku jirta oo daboolan ay jabiso sharciyadan.

CIDA LALA XIRIIRAYO: XAFIISKA MIQYAASYADA SHAQAALAHA

Shirkadaha Shabakadda Kujira

Hel caawimo farsamo
iyo/ama hel tababar

Shaqaalaha App-ka Ku-saleysan

Cabasho ka xarayso OLS
ama cabasho ka xarayso
maxkamad

206-256-5297

www.seattle.gov/laborstandards



Seattle Office of Labor Standards

810 THIRD AVE, SUITE 375

SEATTLE, WA 98104

SAACADAHA: 8:00 subaxnimo -

4:00 galabnimo (MON-FRI)

LABORSTANDARDS@SEATTLE.GOV

Hadafka Xafiiska Miqyaasyada Shaqaalaha waa in uu horumariyo miqyaasyada shaqada iyada oo loo marayo kaqaybgal bulsheed oo fikir badan leh iyo mid ganacsiyeed, dhaqangelin istaraatiijiyadeed iyo horumarinta siyaasado/nidaamyo hal-abuur leh, iyadoo ay jirta u-heelanaan ku aadan jinsiyadda iyo caddaaladda bulshada.

Xafiiska Miqyaasyada Shaqaalaha (Office of Labor Standards) wuxuu bixiyaa turjumado, tafsiiro, iyo aqbalaadyo loogu talagalay dadka naafada ah.